

Dowladda SSC-Khaatumo
ee Soomaaliya

Wasaaradda Maaliyadda



SSC-Khaatumo State of Somalia

Ministry of Finance

Xafiiska Wasiirka

Tixraac: SSC/WM/XW/XN001/2024

Taariikh: Ogosto 1, 2024

XEER-NIDAAMIYAHA MAAMULKA DAKHLIGA QAADHAANKA BULSHADA

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeedooyinka lagu sheegay Qodobka 2 (4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in la sameeyo nidaam cad oo lagu maamulo Maaliyada Maamulka si loo hubiyo isla xisaabtan dhamaystiran, isla markaana loo sharciyeeyo qaabka ugu haboon ee diyaarinta iyo isticmaalka Miisaaniyada Maamulka SSC-Khaatumo.

Isagoo u hoggaansamaya awoodadaha lagu sheegay Qodobka 8(1) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyadda masuul ka yahay dhammaan siyaasadaha iyo xaaladaha farsamo ee la xiriira habsami u socodka Nidaamka Maamulka Maaliyadda Maamulka iyo taabagalinta dhamaan agabyadda iyo dukumiintiyada uu dalbanayo Xeerkan.

Markuu arkay Qodobka 9 (1) xarafka L ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu sameeyo Xafiiska nidaam isku xiran oo ku haboon xakamaynta kharashyada iyo dhacdooyinka kale ee dhaqaale ee lagu galay miisaaniyada Maamulka, sidoo kale maamulka lacagaha.

Markuu arkay Qodobka 44(3) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu soo saarayo xeer-nidaamiye qeexaya sida ugu wanaagsan ee Dowladdu u isticmaalayso lacagta.

Isagoo gudanaya Qodobka 10 (4) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu sameeyo, magacaabana Gudiga Maamulka Khasnaadda Guud.

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

Qodobka 1aad

Hordhac

1. Sida aan ka warqabno, qaadhaanka bulshada SSC Khaatumo waa dakhliga koowaad ama labaad ee maamulkeena, waa dakhli ballaadhan oo u baahan ilaalin iyo kor u qaadis ba.
2. Si loo joogteeyo, korna loogu qaado dakhliga qaadhaanka bulshada waxaa lagama maarmaan ah in loo sameeyo xeernidaamiye lagu hago hawlaha la xidhiidha dakhligaas sida, dejinta qoondo miisaaniyadeed oo si cad u qeexaysa qaadhaanka bulshada laga rabo, xareeynta iyo xisaabinta dakhliga soo dhaca, warcelin iyo xisaabcelin joogto ah si loo hagaajiyo xidhiidhka bulshada iyo maamulka.
3. Haddaba, xeernidaamiyahan wuxuu qeexayaa qodobbada la xidhiidha dhammaan maareeynta qaadhaanka bulshada SSC-Khaatumo.

Qodobka 2aad

Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-Nidaamiyahan waxa loogu yeedhayaa Xeer-Nidaamiyaha Maamulka Qaadhaanka Bulshada SSC-Khaatumo.

Qodobka 3aad

Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyaha

Xeer-Nidaamiyahan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan dakhliga ka yimaadda qaadhaanka bulshada SSC-Khaatumo.

Qodobka 4aad

Erey-Bixin

Diiwaangalin: waxa loola jeedaa la socodsiinta Hantidhowraha Guud awood siinta kharash bixinta si uu dib ugu sameeyo baaritaan kolka kharashka baxo, looma adeegsan karo qaab ansixin ah.

Khasnadda Fudud: Khasnad Fudud waxaa loola jeedaa akoonka ka furan lambar sida ZAAD, Sahal iyo eDAHAB.

Khasnadda Guud: Khasnad Guud waxaa loola jeedaa akoonka ka furan bangi sida: Salaam, Amal iyo Dahabshiil.

Warbixinnada: waxaa laga wadaa in laga warbixiyo dhaqdhaqaaqyada lacageed ee dhex mara akoonada samahale sida lacagaha soo dhaca iyo kuwa ka baxa.

Wasaaradda: Waxa loola Jeedaa Wasaradda Maaliyadda ee Maamulka SSC Khaatumo ee Soomaaliya;

Wasiir: Waxaa loola jeedaa Wasiirka ka masuulka ah Maaliyadda;

Xisaab Xareynta: Waxaa looga golleeyey in dhaqdhaqaaqyada akoonada la diiwaangeliyo ayadoo la marinayo jiiwanno kadibna lagu xareysanayo hannaanka xisaabeedka ee hadda la adeegsado.

Xisaabiyaha Guud: Waxa loola jeedaa sarkaalka u xilsaaran ama leh Awoodda Xafiiska Xisaabiyaha Guud;

Qodobka 5aad

Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan waxa ka mid ah:

1. Wanaajinta hab-maamulka maaliyadeed ee maamulka SSC-Khaatumo si loo hirgeliyo nidaam hufan, daahfuran oo ku qotoma xeerar iyo habraacyo.
2. Hirgelinta iyo fulinta khasnadda mideysa sida uu waajibinayo Xeerka Maamulka Guud ee Maaliyadda SSC-Khaatumo, Xeer Lr 1, 2023.
3. Hirgelinta warbixin mideysan si loo helo qoondayn iyo warbixin maaliyadeed oo sugan si loo gaadho go'aanno iyo qiimeynno sax ah oo xog ku saleysan.

4. Hagaajinta iyo kor uqaadista xidhiidhka bulshada iyo maamulka si looga wada shaqeeyo duruufaha iyo awoodaha dhaqaale ee deegaanka.

Qodobka 6aad

Guddiga Maamulka

Xeer-nidaamiyahan wuxuu waajibinaya in maamulka iyo maareeynta qaadhaanka bulshada ay ka wada shaqeeyaan xubnahan hoos ku taxan:

1. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
2. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda
3. Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda
4. Khasnajiga gaar ee u xilsaaran qaadhaanka bulshada
5. Guddoomiyeyasha bulshada
6. Guddoomiyaha Ururka Samahele
7. Khasnajiga Ururka Samahele

Qodobka 7aad

Khasnadda iyo Akoonada

1. Akoonnada iyo khasnadaha lagu maamulo qaadhaanka bulshada waa in lagu diiwaangeliyaa Magaca “**Ururka Samahele**”, sidoo kale waa in dhammaan akoonada iyo lambarada hadda la adeegsado lagu diiwaangeliyaa magaca “**Ururka Samahele**”.

Qodobka 8aad

Maamulka Khasnadda Guud

1. Akoonada iyo khasnadaha Ururka Samahele, waxaa si guud u maamuleysa Wasaaradda Maaliyadda SSC-Khaatumo iyo ciddii kale ee ay u xilsaarato.

2. Dhammaan qaadhaanka bulshada ka yimaadda waa in la dhigaa khasnadaha guud “bangiyada”.
3. Khasnadaha guud/bangiyada ee Ururka Samahele waxaa lacagaha laga saarayaa ayadoo la adeegsanayo “Jeeg”, waxaana lagu ladhayaa dhammaan codsiyada iyo lifaaqyada kharashyada suurto galka ah si loo helo tixraac sugan.

Qodobka 9aad

Maamulka Khasnadda Fudud (Petty Cash)

1. Khasnadda Fudud (Petty Cash) waxaa maamulaya khasnija loo xilsaaro, ayadoo la jaagoohnayo qoondo go’an oo lagu saleeynayo baahiyaha joogtada ah.
2. Dhammaan lacagaha laga bixiyo Khasnadda Fudud (Petty Cash) waxaa lagu diiwaangelinayaa “**Xaashida Lacag-bixinta (Payment Voucher)**”, waxaana lagu ladhayaa dhammaan lifaaqyada kharashyada ee suurto galka ah.

Qodobka 10aad

Diyaarinta Miisaaniyadda

1. Si loo helo halbeeg xog maaliyadeed iyo sees laga duulo, waa in qaadhaanka bulshada loo dejiyaa miisaaniyad cad, faahfaahsan, oo qeexaysa bulshokasta iyo qoondada dakhli ee laga filayo.

Qodobka 11aad

Xisaab Xareynta Qaadhaanka Bulshada

1. Sida ay waajibinayaan xeerarka caalamiga ah ee lagu maamulo hannaanka maaliyadeed waa in dhammaan dhaqdhaaqqyada ka dhaca akoonada iyo khasnadaha **Ururka Samahele** lagu xareeyaa hannaan xisaabeedka Wasaaradda Maaliyadda si lamid ah dakhliga cashuuraha, ayadoo la diiwaangelinayo, lana xareeynayo dhammaan dakhliga mara iyo kharashka ka baxa.

Qodobka 12aad

Dakhli Xareynta Qaadhaanka Bulshada

Dakhli xareynta qaadhaanka bulshada SSC-Khaatumo waxay mareysaa talaabooyinkan hoose:

1. Dakhli kasta oo ah qaadhaanka bulshada waa lagu shubaa bangiyada Ururka Samahele.
2. Dakhli kasta oo ka yimaada qaadhaanka bulshada waa in lagu qabtaa jiiwanka dakhli qabashada ee loo asteeyey qaadhaanka bulshada.
3. Khasnajiga gaarka ah ee Ururka Samahele waa inuu si maalinle ah u diiwaangeliyaa ayadoo la marinayo jiiwanka dakhliga qabashada, laguna xareeyaa hannaanka xisaabeed ee Wasaaradda Maaliyadda.
4. Dakhliga qaadhaanka bulshada waa in bilkasta si joogto ah loo xidhaa lana hubiyaa.

Qodobka 13aad

Kharash Bixinta Akoonada Ururka Samahele

Kharash bixinta akoonada Ururka Samahele waa inay maraan tallaabooyinkan hoose:

1. Kharashaadka gaadhaya ama ka badan \$500.00 (labo kun oo doolar) waa in toos looga bixiyaa bangiga ayadoo la adeegsanayo jeeg.
2. Khashaadka degdegga kana hooseeya \$500.00 (labo kun oo doolar) waa in laga bixiyaa Khasnadda Fudud (Petty Cash).
3. Xaddiga lacageed ee Khasnadda Fudud (Petty Cash) waa in lagu jaangooyaa \$4,000.00 (shan kun oo doolar).
4. Markasta oo la soo codsanayo buuxinta xaddiga Khasnadda Fudud (Petty Cash) waa in la soo xisaab celiyaa lacag-bixintii hore.

Qodobka 14aad

Warbixinnada Akoonada Ururka Samahele

Xeernidaamiyahan wuxuu waajibinayaa:

1. In si joogto ah loo diyaariyo warbixinta khasnadaha Ururka Samahele, loona diyaariyo maalinle, bille, saddex biloodle iyo sannadle.
2. In markasta oo lacag soo dhacdo jiiwanka lacag-qabashada lala wadaagaa guddida guddoonka bulshada.
3. In bilkasta, guddida bulshadu lala wadaago warbixinta dakhliyada iyo isbarbardhigga qoodadii miisaaniyadda.

Qodobka 15aad

Xidhiidhka Bulshada

Si loo helo xidhiidh wanaagsan, waara oo waxtar u leh guud ahaan bulshada, gaar ahaan kuwa qaadhaanka bixiya iyo maamulka waa:

1. In **WhatsApp** lagu mideeyaa guddiyada guddoonka bulshada, masuuliyiinta wasaaradda iyo guddoonka Ururka Samahele.
2. In markasta, jiiwanada lacag qabashada lala wadaagaa guddiyada bulshada, lana soo dhigaa “WhatsApp Group” ka.
3. In bilkasta lala wadaagaa warbixinta billaha ah iyo xogta falanqeynta isbarbardhigga qoodada miisaaniyadda iyo dakhliga soo xaroodey bishaas.
4. In shirar joogta ah la qabtaa oo lagaga arrinsanayo aayaha iyo horumarinta bulshada SSC-Khaatumo.
5. In shir guud oo bulshadoo dhan ah la qabtaa si loo siiyo warbixin guud, jiheynta qorsheyaasha maamul iyo kuwa maaliyadeed.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Sowladda SSC Khaatumo

Saxeex: _____

